Is-raacitaan

Maalin walba, dad badan ayaa ogaada faa'iida isku raacista shaqaddaw. Kam fududa oo kama jabna oo kaliya kaxaysashadda gaadhigaaga, ee way ka raaxo badan tahay tagista iyo ka imaatinka shaqaduba.

Metro-ga King County wuxuu leeyahay xumbuliyadda dadka meelaha fog u shaqo taga iyo hab fudud oo kaa caawinaysa inaad hesho shaqaale iyo dad kale oo degaankaaga ah oo doonaya inaad shaqadda wada tagtaan.

Gaadhi-wadaag (Carpool)
Haddii u jiro saaxiib ama qof aad wadda shaqaysaan oo ku nool meel kuu dhow oo saacadihina shaqaddu isku mid yihiin, waad is raaci kartaan waxaanad kala badh dhimi kartaan kharashka gaadhiga. Xataa waxaad madhxin kartaa in aad uga badan haddii aad gaadhi la wadaagto saddex ama afar qof oo kale. Koox wada shaqo taggu waa hab ka degdeg badan oo loo shaqo tagi karo sababtoo ah waxaad mari kartaan haad gooni ah oo ka saxmad yar haadadka kale ee wadda.

Bas xumbuliyadda dadka shaqo tagga ah:
Bas-wada raacis (Vanpool)
Waxaad isku raaci kartaan shaqadda dad tiradoodu yar tahay oo ah afar, iyo kuwo badan oo ah ilaa 14 qof, waxaanad ku raaxaysan kartaa bas-wadaag fiican oo raaxo leh oo ay leedahay Metro. Baska waxaa leh, shidaalaysa, hagaajisa, oo caymisay Metro, sidaa awgeed warwar gaadiid oo badan ma yeelanaysid. Qof ka mid ah dadka aad wadaagaysan baska ayaa ku tabarucaya inuu noqdo darawal, taa badalkeed, wuxuu qofkaasi ku raaci doonaa bilaash. Darawalku waxaa sidoo kale laga yaabaa inuu gaadhiga u isticmaalo hawlo gaar ah. Dhamaan rakaabka baskaaga ayaa bixinaya basraac bile ah oo jaban, oo aad uga jaban inaad adigu gaadhigaaga kaxaysato.

Bas-wadaag (Vanshare)
Haddii aad ka shaqayso ama aad ku nooshahay meel basasku iyo tareenadda aan laga heli karin, waxaad adeegsan kartaa bas Metro ah si uu kaaga caawiyo meesha aad ka heli akrto. Waa tan sida ay u shaqayn kartaa: haddii aad ku nooshahay Auburn oo aad ka shaqayso Seattle, waxaad badhtamaha Seattle u raaci kartaa bas ama LINK, kadibna waxaad la kulmi kartaa afarta ama ka badan ee qof ee kale waxaanad wadaagi kartaan baska oo aad ku aadaysaan goobaha shaqada sida South Lake Union. Shaqadda kadib, waxaad baska dib ugu soo celinaysaa baarkinka Metro oo waxaad raacaysaa baska ama tareenka.

Sidaad u bilaabayso:

- Si aad ugu biirto ama u bilowdo gaadhi-wadaag, bas wada-raacis ama bas-wadaag booqo www.RideshareOnline.com si aad u hesho liis bilaash ah oo ah dadka kuu dhow ee aad isku safarka tihiin.
- Hel kitka Bilaabida Baska adigoo booqanaya http://metro.kingcounty.gov isla markaana dooranaya "Rapidshare".
- Waad daabacan kartaa kitka bilaabidda ama waxaad wici kartaa 1-800-427-8249 si mid laguugu soo diro adiga.
- Taag calaamad adigoo raadinaya dadka doonaya inaad meel fog u wada socdaashaan.
- Maamulahaaga haddii uu jiro qof shaqada jooga oo kaa caawin kara inaad hesho faahfaahin ku sahabsan basaska Metro.

Baska
Raacida basku waa hab muhiim ah oo loo socdaali karo. Socdaalkaaga ka qorshee interneka adigoo booqanaya http://metro.kingcounty.gov ama wac 206-553-3000, 1-800-542-7876 oo bilaash, TTY Relay: 711.

Macnaha:
Socdaal: waa socdaalka aad ku tagto ama kaga timaad shaqadda.

Gaadhi-midow: waa marka laba iyo ka badan oo wadaagaan socdaal shaqo ama dugsi. Raacida dadka kale waxaa sido kale la yidhaa "israacis".

Bas-midow: u socdaalida shaqadda iyo ka imaatinkeed ee la wada raaco bas Metro ah ugu yaraan afar qof.

Vanshare: In qaybka socdaalka shaqadda loo isticmaalo bas Metro leedahay.